

Bulshada Qaaliga ah ee Dugsiyada Dadweynaha Boston:

Inkastoo khatartu weli hooseyso Boston hadda, Dhamaanteen waxaan ku jirnaa Dugsiyada Dadweynaha Boston (BPS) waxaan ka walaacsanahay joogitaanka sii kordhaya ee cudurka hergebka dabeysha 2019 (sidoo kale la yiraahdo COVID-19) ee Mareekanka. Waxaan u qoreynaa inaan ku siino macluumaadka ugu dambeeya iyo jihayn ka socota Xarunta Xakamaynta Cudurada (CDC), Waaxda Caafimaadka Dadweynaha Massachusetts (DPH) iyo Golaha Caafimaadka Dadweynaha Boston (BPHC) la xiriira hergebka dabeysha.

Dadka u safray Shiinaha, Iran, Italy, Japan, ama South Korea waxaa laga codsaday inay guriga joogaan 14 maalmood markay ku soo noqdaan Mareykanka si ay ula socdaan caafimaadkooda waxaana laga codsanayaa inaysan aadin dugsi ama shaqo. Tani waxay quseysaa safarka dhacay labadii toddobaad ee la soo dhaafay iyo sii socoshada. Waxay kaloo khuseysaa haddii ilmahaagu hore ugu soo noqday dugsi iyo in kale tan iyo soo noqoshada.

Qoysasku waa inay la xiriiraan dugsiyadooda ayna soo sheegaan maqnaanshaha ardayda sabab la xiriirta xanibaadaha safarka awgeed. BPS way kula soo xiriiri doonaan si ay kuugu habeeyaan waxbarasho munaasib ah iyo taageero inta ardaygaagu guriga joogo.

Waa maxay “kormeer caafimaadkaaga” micnaha?

- Ku qaad heerkulkaaga ee heerkulbeega laba jeer maalintii oo iska ilaali qandho. Xummaddu waa heerkul 100.4 ° F / 38 ° C ama ka sareeya.
- U fiirso calaamadaha ay ka mid yihiin qandho, qufac, neefsashada oo dhib ah, iyo neefta oo kugu yaraata.

Waa maxay micnaha in la xaddido is dhexgalka?

- Ha qaadan gaadiidka dadweynaha, taksiyada, ama wadaagida gawaarida muddada 14-ka maalmood ah.
- Ka fogow meelaha dadku ku badan yihiin (xarumaha wax iibsiga, dugsiyada, goobta shaqada, kaniisada iyo masraxa filimada).
- Ka fogow dadka kale (6 tallaabo ama 2 mitir ka fog).

La xiriir daryeel caafimaad bixiyahaaga haddii calaamaduhu muuqdaan. Haddii aadan haysan daryeel caafimaad bixiye, fadlan la xiriir qolka xaaladaha degdegga ah ee deegaanka oo ka wada hadal calaamadahaaga iyo taariikhda safarkaaga ka hor intaadan kuu diyaarin inuu ku arko takhtarka.

Dhamaanteena bulshada BPS waa inaan ku dhaqano taxadarada soosocda ee la cadeeyay si loo yareeyo halista faafista fayruska neefsashada oo aana qofkasta ka badbaadino:

- Ku dhaq gacmahaaga saabuun iyo biyo ugu yaraan 20 sekan – oo ah qiyaastii dhererka ay qaadanayso in lagu heeso “Dhalasho Wacan” laba jeer.
- Haddii aadan heli karin saabuun iyo biyo, isticmaal alkolo ku saleysan gacmo nadiifiye.
- Ka fogow in aad taabato indhahaaga, sanko, ama afka gacmaha aan la dhaqin.
- Ka fogow xiriir dhow inaad la yeelato dadka jiran.
- Si joogto ah u nadiifi oona ka dil jeermiska sheeyada iyo sagxadaha uutaabtay qofka qaba calaamadaha.

Macluumaad dheeri ah ayaa laga heli karaa bphc.org ama cdc.gov iyo tarjumaadaha qalabyadooda ayaa laga heli karaa websaydhkooda iyo ka hoose.

CDC Waxa loo Baahan yahay in aad ka Ogaato: [Ingiriiska](#), [Shiinaha](#), [Isbaanishka](#)

CDC Waxa la Sameeyo haddii aad Adiga Xanuunsantahay: [Ingiriiska](#), [Shiinaha](#), [Isbaanishka](#)

Xaqiiqda Xaashida Guddiga Caafimaadka Dadweynaha Boston: [Ingiriiska](#), [Shiinaha](#), [Haitian Creole](#), [Boortaqiiska](#), [Isbaanishka](#), [Vietnamese](#)

Haddii aad qabtid su'aalo qaas ah, waxaa lagugu soo dhaweynayaa inaad wacdo Leenka Caafimaadka Duqa-magaalada ee 617-534-5050 inta lagu gudajiro usbuuca ama garaac 311 saacadaha shaqada ka dib iyo usbuuc-dhammaadka.

Tani waa xaalad si dhakhso ah isu beddeleysa. Waxaan maalin walba la xiriiireynaa madaxda caafimaadka dadweynaha si dhawna ula socona xaaladda. Waxaan ku siin doonnaa macluumaad cusboonaysiin ah markii la helo. Waxaad ka heli doontaa taas websaydhka BPS ee www.bostonpublicschools.org/coronavirus.

Caafimaad Ku joog iyo Badbaado.

Si daacad ah,



Brenda Cassellius
Kormeeraha guud